**Codsiga Mag-dhawga ee ku Saabsan Waxyeellada Loo Haysto Maamulka Magaalada Seattle Su'aalaha Caadi Ahaan La Is Weydiiyo**

**S: Waa maxay codsiga mag-dhawga?**
**J:** Codsiga mag-dhawga waa codsi lacageed ee ku saabsan khasaarihii, dhaawacii, ama dhibaatoyinkii ka dhashay dhacdo/shil.

**S: Waa maxay sharciga nidaamka u yeelaya codsiga mag-dhawga?**
**J:** Waxaa uu nidaamka codsiga mag-dhawga qayb ka yahay Sharciga Gobolka Washington Xeerka Wax Laga Beddelay ee Washington (RCW) 4.96.020 iyo Xeerka Dawladda Hoose ee Seattle 5.24.005.

**S: Muddo intee ah ayaan qabaa si aan u gudbiyo codsi mag-dhaw ah?**
**J:** Waa in aad codsiga mag-dhawga ku soo gudbisaa muddada u dhigan gobolka. Waxaa jirta in xadka muddada uu u kala duwan yahay noocyada codsiyada mag-dhawga ee kala duwan. Waxaad Eegtaa RCW 4.16.160.

**S: Waxaan buuxiyey warbixin markii uu shilka igu dhacay, ma in aan codsi mag-dhaw ah soo gudbiyaa?**
**J:** Haa. Waa in aad codsi mag-dhaw ah soo gudbisaa haddii aad dareensan tahay in Maamulka Magaalada Seattle ay ka mas'uul yihiin khasaaraha, dhaawaca, ama waxyeellada.

**S: Sideen codsiga mag-dhawga ugu soo gudbiyaa Maamulka Magaalada Seattle?**
**J:** Waxaad soo daabacan kartaa foomka codsiga mag-dhawga, soo wici kartaa si aad u codsato foomka codsiga mag-dhawga, ama ka qaadan kartaa foomka codsiga mag-dhawga Xafiiska Karaaniga Magaalada.

Daabaco foomka codsiga mag-dhawga
www.seattle.gov/riskmanagement

**Soo wac** si aad foomka u codsatid:
206-684-8213

**Soo doono** foomka:
City Hall
Office of the City Clerk, Floor 3 600 4th Avenue, Seattle

**S: Waa maxay macluumaadka ah in aan foomka raaciyo?**
**J:** Codsiga mag-dhawga **waa in** ay yaalliin

1. magaca iyo cinwaanka qofka codsiga mag-dhawga soo gudbinaayo,
2. taariikhda iyo meesha ay waxyeelladu ka dhaceen,
3. dhacdo eedeyn ah ama ka reebis ku saabsan Magaalada,
4. waxa saldhigga u ah in ay Magaaladu ka mas'uul tahay,
5. markhaatiyaal la yaqaan,
6. tifaftirka nooca iyo inta ay gaarsiisan tahay dhaawaca ama waxyeellada, iyo
7. inta la codsanayo.

Codsiga mag-dhawga **waa in** uu soo saxiixaa qofka soo gudbinaya.

**S: Miyeey tahay in aan dukumeentiyo kale soo raaciyo?**
**J:** Waxay caawinaysaa codsigaaga in aad soo raaciso waxyaabaha taageersan, sida rasiidyo, qiyaas, iyo qaansheegtooyin, oo ay raacsiisan yihiin caddeymaha, sida sawirro, naqshado, iwm. Dukumeentiyada oo idil ee lala soo gudbiyo codsiga mag-dhawga waxaa yeelanaysa Magaalada waxaana ay galayaan diiwaanka dadweynaha.

**S: Halkeen u gudbiyaa codsiga mag-dhawga?**
**J:** Codsiga mag-dhawga ku saabsan waxyeellada loo haysto Magaalada waa in qof ahaan loo gudbiyaa Karaaniga Magaalada ama boosto loogu diraa.

**Cinwaanka wax loogu diro:**
Office of the City Clerk
PO Box 94728
Seattle, WA 98124-4728

**Cinwaanka Dariiqa:**
City Hall, Office of the City Clerk, Floor 3
600 4th Avenue
Seattle, WA 98124

**S: Maxaa dhacaya marka aan codsiga mag-dhawga gudbiyo kaddib?**
**J:** Codsigaaga mag-dhawga waxaa loo dirayaa Xafiiska Maamulka Khatarta Magaalada maalinta la shaqeynayo ee xigta marka aad u gudbiso Karaaniga Magaalada. Waxaa boosto lagugu soo dirayaa caddeynta in codsiga mag-dhawga la helay. Wakiilka codsiga mag-dhawga ayaa kaddibna baaraya codsigaaga. Xalalka suuragalka ah ayaa waxaa ka mid ah in Magaalada:

1. ay bixiso tiro lacag ah,
2. ay codsigaaga ku wareejiso koox ama hay'ad kale, ama
3. ay diido codsiga mag-dhawga taasoo ay ugu wacan tahay in aysan jirin wax khaladka ku caddeynaya Magaalada.

**S: Goorma ayuu wakiilka ila soo xiriiri doonaa?**
**J:** Caadi ahaan qof wakiil ah ayaa qoraal kugula soo xiriiri doona 2 illa 3 maalmaha la shaqeeyo gudahooda kaddib marka loo xilsaaro codsigaaga. Wakiilka codsigaaga loo xilsaaray ayaa ogaanaya lambarka codsigaaga kaddibna codsan doona dukumeentiyada kale ee loo baahan yahay si loo baaro codsigaaga mag-dhawga.

**S: Muddo intee ah ayuu baaritaanka qaadanayaa?**
**J:** Muddada uu baaritaanka codsiga mag-dhawga qaadanayo waa uu u kala duwanaanayaa kiisaska. Qiyaastii, codsiyada mag-dhawga waxaa lagu xalliyaa illaa iyo 60 maalmood.

**S: Waa maxay waxyaabaha la tixgelinaayo marka codsi mag-dhaw ah la qiimeynayo?**
**J:** Waxyaabaha codsiga mag-dhawga loo tixgelinaayo waxaa ka mid ah

1. caddaymaha khasaaraha la sheeganayo,
2. sharciga uu quseeyo,
3. haddii Maamulka Magaalada Seattle uu sharciga mas'uul uga dhigaayo
4. doorka codsadaha uu arrinta ka qaadanayo, iyo
5. nooca iyo xadka uu gaarsiisan yahay dhibaatooyinka la sheeganaayo.

**S: Waa la i dhaawacay. Yaa bixinaayo kharashkayga caafimaadka?**
**J:** Adiga ayaa ka mas'uul ah dhammaan kharashyada caafimaadka ee aad gasho. Haddii aad aaminsan tahay in Maamulka Magaalada Seattle ay ka mas'uul yihiin dhaawacaaga, waa in aad codsi mag-dhaw ah soo gudbiso. Waxaa la baarayaa wacyiga keenay dhaawacaaga. Haddii xal la gaaro, waxaa suuragal ah in dibu celinta kharashkaaga caafimaadka uu qayb ka yahay. Maamulka Magaalada si toos ah lacagta **uma** siiyaan dhakhaatiirta.

**S: Waxaan doonayaa gaari kiro ah sababtoo ah si xun ayeey gaarigayga wax u gaareen ama waa halis oo lama kaxeyn karo. Sideen u heli karaa gaari kiro ah?**
**J:** Inta aan codsi mag-dhaw ah la soo gudbin ama baarin, Maamulka Magaalada Seattle ma ay oggolaanayaan in ay bixiyaan kharashka kirada gaariga. Haddii aad doonayso gaari kiro ah, waa go'aan adigu kuu gaar ah. Waxaad fadlan fahantaa in wakiilka codsiyada ay tahay in uu soo gabagabeeyo baaritaanka si go'aan looga gaaro cidda ka mas'uulka ah inta aan la oggolaan bixinta kirada gaariga. Illaa inta laga gaarayo, waxaad xulan kartaa in aad la xiriirto shirkadda caymiska gaarigaaga si ay kuu caawiyaan. Haddii aad go'aansato in aad gaari kireysato oggolaashada ka hor, waxaa suuragal ah in aad ka mas'uul noqoto dhammaan ama qayb ka mid ah kharashka.

**S: Sideen ku ogaadaa halka uu codsigayga mag-dhawga marayo?**
**J:** Waxaad wacdaa wakiilka codsigaaga mag-dhawga. Haddii aadan haysan lambarka taleefoonka tooska ah ee wakiilka, waxaad ka wacdaa Xafiiska Maamulka Khatarta Magaalada taleefoonka 206-684-8213.

**S: Halkeen ka heli karaa turjubaan?**
**J:** Waxaad wacdaa Xafiiska Adeegga Macaamilka ee Dawladda Hoose ee Seattle taleefoonka 206-684-2489 (TDD/TTY 206-615-0476). Iyaga ayaa kuu helaayo adeegyada tarjumidda.